MNsure
Where you choose health coverage

# Samaynta Akoonka iyo Ogolaanshaha Caawiyaha

Foomkani wuxuu siinayaa kaaliyaha ay MNsure-ansixisay awood ah inuu akoon MNsure.org magacaaga kuugu sameeyo oo uu soo gudbiyo codsi isaga oo adiga ku matalaya. WAXAA KALIYA OO LOOGU TALAGALAY dadka aan heli karin kombiyuutar si ay u samaystaan akoon oo isla markaana aan shaqsi ahaan ula kulmi karin caawiyaha. Fadlan si taxaddar leh u akhri oo u buuxi foomkan.

**Macluumaadka Macaamiilka:**

Magaca hore iyo ka dambe: ____________________________________________

Taariikhda Dhalashada: ______________________

Cinwaanka emailka (ikhtiyaari): ____________________________________________

Cinwaanka: ____________________________________________________________

Magaalada: ________________________ Gobolka: _____ Zip code: __________

**Digniinta asturnaanta**

Waxaanu kuu waydiinaynaa macluumaadkan kugu saabsan si aanu kuula soo xiriiri karno haddii loo baahdo iyo inaan xaqiijino qofka aad tahay. Macluumaadka aad nasiiso waa mid asturan. Sharci ahaan lagaagama baahna inaad bixiso macluumaadkan mana jiraan wax cawaaqib ah haddii aadan buuxin foomkan, in kasta oo caawiyahaagu uusan awoodaynin inuu kuu sameeyo akoon oo uu kuu dalbo caymiska caafimaadka isaga oo adiga ku matalaya. Shaqaalaha MNsure waxay heli doonaan macluumaadkan, iyo sidoo kale dadka kale ee awood sharci u leh. MNsure waxay hayn doontaa illaa toban sano. Ogaysiiskan qarsoonaanta kuma jiraan Xeerarka isticamaalka iyo Ogaysiiska Asturnaanta ee MNsure.org haddii aad siiso MNsure macluumaad dheeri ah si loo samaeeyo akoon ama aad dalbato caymis caafimaad. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan Shuruudaha Adeegsiga MNsure iyo Digniinta Asturnaanta ee Ka Qaybgaleyaasha MNsure, soo booqo https://www.mnsure.org/resources/terms-conditions.jsp.

**Samaynta Akoonka**

Marka aad buuxiso oo aad saxeexdo foomkan, waxaad u ogolaanaysaa caawiyahaaga inuu akooon kaaga sameeyo MNsure.org sababta oo ah ma haysatid kombiyuutar isla markaana aan shaqsi ahaan ulama kulmi kartid caawiyaha. Samaysashada akoonku waa tallaabada ugu horreysa ee go'aaminta u-qalmitaankaaga nacfiyada iyo isu-diiwaangelinta caymiska caafimaadka. Si loo sameeyo akoon cusub, MNsure waa inay qabato macluumaad ku filan si loo caddeeyo qofka aad tahay. Caawiyahaaga ayaa kaa codsan doona macluumaadkan si uu u geliyo marka uu samaynayo akoonka. Macluumaadkaagu waa qarsoodi isaga ama iyadu waa in ay ilaaliyaan. Marka uu caawiyahaagu kuu samaynayo akoonkaaga, isaga ama iyadu waa inay ku siiyaan digniinta qarsoonaanta ee MNsure ee ku saabsan macluumaadka lagaa codsanayo oo uu ku waydiiyo inaad ogolaato xeerarka iyo shuruudaha MNsure. Marka aad caawiyaha weydiisato inuu kuu sameeyo akoon, waxaad ogolaatay in aad u isticmaasho nidaamka siyaabaha la ogolyahay oo keliya, iyadoo la waafajinayo sharciga gobolka iyo federaalka, iyo in aad ogolaatay Xeerarka iyo Shuruudaha MNsure. Nuqul ka mid ah digniinta asturnaanta iyo xeerarka iyo shuruudaha ayaa laga heli karaa https://www.mnsure.org/resources/terms-conditions.jsp. Caawiyahaagu kuuma samayn karo akoon haddii aadan ogolaanin.

**Ku xiriirsanaanta Caawiyaha**

Marka aad buuxiso oo aad saxeexdo foomkan, waxaad sidoo kale siinaysaa ogolaansho in uu caawiyahaagu galo akoonkaaga oo uu isku xiriiriyo akoonkaagaa iyo akoonka caawiyahaaga. Kadib marka akoonkaaga lala xiriiriyo caawiyahaaga, isaga ama iyadu waxay awood u leedahay in ay ku shaqayso/ku shaqeeyo isaga/iyada oo u mataleya adiga iyo qof kasta oo kale ee kujira arjigaaga ficilada soo socda:

- In uu helo xogtaada si uu u bixiyo u adeega macaamiisha
- In uu arji ku buuxiyo macluumaadka ku saabsan adiga ama qoyskaaga
- In uu soo diro arjiga isaga oo adiga ku metelaya
- In uu dooro qorshe caafimaad oo u qalma
- In uu dooro oo uu dalbo qaddarka canshuur dhaafka hormariska ah

Waxaad sidoo kale awood u siinaysaa caawiyahan inuu bixiyo oo uu arko macluumaadka ku saabsan dadka ku jira arjigaaga oo dhan. Codsadeyaasha MNsure ama caawiyaha bixinaya ee arkaya macluumaadka qofka isaga oo matalaya codsadaha ama xubnaha qoyska, ku tiirsaneyaasha, shaqaalaha ama kuwa kale, waxay cadeeyaan inay haystaan ogolaanshaha shakhsiga macluumaadka iska leh, ama waxay u yihiin mas'uulka sharciga ah, ama haddii kale waa loo fasaxay inay galaan oo soo gudbiyaan macluumaadka, waana in ay ogolaadaan in ay ilaaliyaan. Shakhsiyaadka fiiriya ama soo gudbiya macluumaad iyaga oo matalaya shaqsi kale ayaa sidoo kale ogolaanaya inay kaliya u adeegsadaan macluumaadka shaqsiga lagu aqoonsan karo ujeedada ah buuxinta arjiga saxda ah ama si kale ee uu ogolyahay sharciga gobolka iyo federaalku iyo in ay ka ilaaliyaan xogta isticamaalka, wax ka beddelidda, burburin, xatooyada ama siidaynta aan loo ogolaanin. Macluumaadka arjiga ku qoran waa xog qarsoodi ah.

Marka aad hoos saxiixdo, waxaad u ogolaanaysaa caawiyahan inuu helo macluumaadka ku saabsan arjigaaga oo uu wax ka qabto arrimaha la xiriira arjigan, oo ay ku jirto saxiixitaanka arjigaaga isaga oo adiga ku matalaya iyo u diiwaangelinta qorshe caafimaad oo u qalma isaga oo adiga ku matalaya. Waxaa kale oo aad qiraysaa inaad wali masuul katahay inaad buuxiso dhamaan wakhtiyada kama dambeysta ah ee isu-diiwaangelinta caymiska.

Fadlan bixi macluumaadka soo socda ee ku saabsan caawiyaha aad rabto inaad u ogolaato:

Magaca hore iyo ka dambe ee caawiyaha: ________________________________________

Hay'ada: ____________________________________________________________________

Lambarka Tixraaca Caawiyaha (Assister Portal Reference number): ____________________

Intaadan ogolaanin ka hor, fadlan dib u eeg Digniinta Asturnaanta ee MNsure, oo sharraxaad ka bixinaysa ujeedada iyo sida loogu talagalay in loo adeegsado aruurinta xogta gaarka ah ee arjigaaga iyo haddii ay jiraan cawaaqibo haddii aad diido in aad bixiso macluumaadka. Digniinta asturnaanta ayaa sidoo kale qeexaysa shakhsiyaadka iyo hay'adaha lala wadaagi karo macluumaadkaaga iyo inta ay leegtahay muddada MNsure ay hayn doonto macluumaadkaaga. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan xuquuqaha iyo waajibaadkaaga gaarka ah ayaa ku yaalla bogga Xeerarka iyo Asturnaanta ee MNsure.org.

Waad joojin kartaa ogolaanshahan wakhti kasta adiga oo u maraya akoonkaaga internetka ee MNsure ama adiga oo soo wacaya Xarunta Xiriirka MNsure.

_____________________________________________      _______________________

Saxiixa Macmiilka      Taariikhda maanta